In Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee haduu tukanaayo wuxuu kala fogayn jiray labadiisa gacmood, ilaa ay muuqato cadaanta labadiisa kilkilo

Cabdullaahi Binu Maalik Binu Buxaynah Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey: In Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee haduu tukanaayo wuxuu kala fogayn jiray labadiisa gacmood, ilaa ay muuqato cadaanta labadiisa kilkilo.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee haduu sujuudayo wuu kala fogayn jiray labadiisa gacmood, oo gacan walba wuxuu u fogayn jiray dhinaceeda, sida labo baal oo kale, ilaa ay muuqato midabka labadiisa kilkilo. taasuna waa iyadoo lagu xeel dheeraado in labada gacmood sida baalal laga dhigo oo qofku ka fogeeyo labadiisa dhinac.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3220